



# GUDDIGA XUQUUQDA MADANIGA EE OHIO

## Dhexdhexaadinta iyo Xallinta Khilaafka

### Barnaamija Dhexdhexaadinta

Dhexdhexaadintu waa hab aan rasmi aheyn oo hufan oo uu fududeeyo dhinac saddexaad oo dhexdhexaad ah oo loogu talagalay in lagu caawiyo dhinacyada si ay u gaaraan xal. Habkani wuxuu siiyaa labada dhinac nidaam aan qasab aheyn oo khilaafka lagu xaliyo.

### Waa maxay sababta loo Doorto Dhexdhexaadinta?

Guddiga Ohio ee Xuquuqda Madaniga (OCRC) barnaamijkiisa dhexdhexaadinta waxaa la soo saaray oo la hirgaliyaa 1997. Celcelis ahaana, OCRC waxay awoodaan inay si guul leh u xaliyaan qiyaastii 85% dhammaan kiisaska loo maro dhexdhexaadinta.

- Ka qaybgalka Mutadawucnimada**  
Dhammaan dhinacyada eedeyntu quseeyso waa inay ku heshiyaan ka qeyb qaadahada geedi socda howsha loogu bilaabo.

- Qarsoodi**  
Macluumaadka la bixiyo inta lagu jiro dhexdhexaadinta waxay noqon doonaan kuwo qarsoodi ah mana wadaagi doono.

- Cadaalad iyo dhexdhexaad ah**  
Dhexdhexaadiyuuhu wuxuu fududeeyaa isgaarsiinta oo cidna kuma qasbayo xallinta.

- Badbaadi waqtii & lacag**  
Ma jiraan wax lacag ah oo adeegyada dhexdhexaadinta iyo jadwaka loo sameeyo waqtiga ku haboon dhammaan dhinacyada ah. Isku dayid ayaa la sameeynaya si loogu qabto dhexdhexaadinta 45 casho gudahood ah.

### Hanaanka Loo maro Cabashada

Qof kasta oo dareensan inuu yahay dhibane takoorka sababtoo ah, jinsiyadiisa, midabkiisa, diintiisa, qoladiisa, asal qaran, abtirsiiada, naafada, da'da, xaaladda qoys (guriyeenta oo keliya) ama heerka ciidamada ayaa u soo gudbin kara cabasho rasmi ah OCRC. Qofka ayaa sidoo kale soo gudbin kara cabashada iyada oo ku saleysan aargoosi haddii ay aaminsan yihiin in looga aangoosanayo isticmaalidda xaqa ay u leeyihiin in ay soo gudbiyaan dacwad, ka qaybqaadatan baadhitaan ama ka cabanaya waxy-aabo kale oo ku saabsan takoorka.

Haddii nidaamka dhexdhexaadinta lagu guuleysan waayo ama haddii mid ka mid ah dhinacyada aanay rabbin in ay ka qayb qaataan dhexdhexaadinta, kiiska waxa loo gudbin doonaa qaybta baadhitaanka. baadhitaankaas oo loo marayo tallaabooyin taxane ah, kuwaas oo ay ka mid noqon karaan wareysiyada markhaatiga, codsiyada dokumeentiga iyo/ama booqashada goobta, Guddiga ayaana go'aamin doona inuu takoor dhacay ama inuusan dhicin.

Dhammaan adeegyada **waa lacag la'aan** iyo waxaa cabashooyinka looga xarayn karaa qof ahaan xafiiska OCRC ee xaafadaada, telefoonka ama bogeena internetka ee ([www.crc.ohio.gov](http://www.crc.ohio.gov)). Cabashooyinka waa in lagu soo xereeyaa lix bilood gudahood laga bilaabo taariikhda uu dhibku dhacay (ama hal sano kiisaska ku jeeda takoorka guriyeynta).

### Xafiisyada Gobolka

Xafiiska Gobolka Akron  
Ocasek Government Building  
161 S. High St., Suite 205  
Akron, OH 44308  
330-643-3100  
330-643-3120 (Fax)

Xafiiska Gobolka Cleveland  
Lausche State Office Building  
615 W. Superior Avenue  
Suite 885  
Cleveland, OH 44113  
216-787-3150  
216-787-4121 (Fax)

Xafiiska Gobolka Columbus  
Rhodes State Office Tower  
30 E. Broad St., 4th Floor  
Columbus, OH 43215  
614-466-5928  
614-466-6250 (Fax)

Xafiiska Gobolka Dayton  
Point West III  
3055 Kettering Blvd, Suite 111  
Dayton, OH 45439  
937-285-6500  
937-285-6606 (Fax)

Xafiiska Gobolka Toledo  
One Government Center  
640 Jackson St., Suite 936  
Toledo, OH 43604  
419-245-2900  
419-245-2668 (Fax)

Xafiiska Dayax gacmeedka-Cincinnati  
Mid-Pointe Towers  
7162 Reading Rd., Suite 1005  
Cincinnati, OH 45237  
513-351-2541  
513-351-2616 (Fax)